ne.ch
RÉPUBLIQUE ET CANTON DE NEUCHÂTEL

**DÉPARTEMENT DE L'EMPLOI**
**ET DE LA COHÉSION SOCIALE**
SERVICE DE LA COHÉSION MULTICULTURELLE

La Chaux-de-Fonds, 28 août 2026

**Warbixin ku saabsan rabshadaha kadhaca qoyska**

Rabshadaha loogeysto ninka ama xaaska iyo caruurtooda waa xadgudub kadhan xaquuqda aasaasiga ah ee qofka,sharciga Iswiiska waa kamamnuuc.

Ma aha oo kaliya iney mamnuuc tahay rabshadaha jirka ama garaacista. Sidoo kale waxaa mamnuuc ah hadallo iyo dhaqamo soo noqnoda taasoo qofka cabsi galin karta: sida bahdilka,hanjabaada, ka mamnuucida inuu utago ehelkiisa ama asaxaabtiisa iyo caburin joogta ah.

Qaadashada lacagta ninka ama xaaska amar la'aan ama aan kaqeyb qaadan qarshka qoyska waxey kamid tahay rabshadaha. Markii mid kamid ah lamaanaha uu kan kale kuqasbo falal galmo ah uusan raali ka aheyn,waxaa loo aqoonsan yahay rabshad galmo ama xoogitaan.

Dhamaan noocyadan rabshada ah waa falal ciqaab mudan.Waxey kadhacaan dhamaan dalalkasta luuqadkasta iyo dhaqankasta. Booliska waa inuu soo faragaliyaa markey rabshad dhacdo,xitaa hadii dacwad lagudbin.

Dhibanayaasha kayimada dalalka kale,kuwaas oo aan heysan dad wax caawiya, bulsho ku ha reereysan oo caawisa oona fahan saneyn sida caawin loo dalbado ama luuqada wadanka garaneyn ayaa si gaar ah ugu nugul dhibaatooyinka kadhaca qoyska. Waxey caawin kahelikaraan boolisk,adeega caawinta dhibanayaasha iyo adeega wadajirka dhaqamada kala duwan,ayagoo caawintaas ku helaya luuqadooda hooyo.

Dadka geysta rabshadaha waxaa qabanaya booliska, kadibna su'aalo kaweydiin doono dhibaatadii dhacday.ayadoo lafiirinayo dhibaatada inta ay la'egtahay culeyskeeda,kadibna waxaa loogubinkaraa cadaalada ama maxkamada,taas oo go'aamin doonto cinqaab ama tallaabo ku haboon,kana mamnuuci karta inuu qofkaas dhibaato danbe geysan.

Ehelka ama asaxaabta qofka dhibka loogeystay ma ahan iney faragashadaan xaalad aan ayaga quseynin. Waana ka mamnuuc in qof la eedeeyo,loo hanjabo,lacabsi galiyo ama ladhibaateeyo,oo ay kujiraan baraha bulshada ama firiin loogu diro taleefanka.Dabeecadahan qofkii kudhaqmo wuxuu muteysan karaa ciqaab sharci ah,hadii dacwad lagu furo iyo hadii lacafiyoba.

Grégory Jaquet
Maamulaha adeega

Macluumaad
booliska neuchatel, 0328899000
Adeega wadajirka dhaqamada kaladuwan,la talin bulsho oo la tujumaayo,kalsooni iyo qarsoodiba ah: 0328897442
Xarunta adeega caawinta dhibanayaasha ee dambiyada, 032 889 66 49
Macluumaad guud 142

CH-2300 LA CHAUX-DE-FONDS PLACE DE LA GARE 6
TÉL. 032 889 74 42 FAX 722 04 04 COSM@NE.CH WWW.NE.CH/COSM